



Office of Civic Organizing (Xafiiska Abaabulka Madaniga ah (OCO)¹) Qorshaha Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta (LCAP)²

HORDHAC

Baabulka magaalada waa nidaamka joogta ah ee ka qayb qaadashada bulshaddayada, awood siinta dadku inay tallaabo ka qaadaan xaafadooda, iyo abuuridfa ilaha iyodhabooyinka dadka degen magaalada inay si firfircooni uga qayb qaataan Hoolka Magaalada.

Himiladayadu waa in la kobciyo ka qayb qaadasho waarta, la xoojiyo xidhiihada u dhexeeya codeeyayaasha iyo xafiiska Duqa magaalad, a oo la dhiirigeliyo sii abaabulka magaalada. Luqadda iyo helida wada xidhiihku waxay muhiim u tahay himiladayada.

UJEEDDO

Waxay Office Boston Civic Organizing (Xafiiska Abaabulka Madaniga ah (OCO)) diyaarisay Language and Communications Access Plan (Qorshaha Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta (LCAP)) si loo qeexo borotokoolada iyo habraacyada ay hirgelisay OCO si ay u xaqijiso helida wax ku oolka iyo guud ee adeegyada, barnaamijyada iyo waxqabadyada OCO ee dadka loo aqoonsado inay ku hadlaan Luuqad aan ahayn Ingiriisi iyo/ama dadka naafada ah.

Qeexida Dadka ku hadla luuqad aan Ingiriisi ahayn (LOTE)

Dadka leh kartida xaddidan ee akhriska, qoraalka, hadalka, ama fahanka Ingiriisiga waxay xaq u yeelan karaan kaalmada luuqadeed oo ay weheliso nooc gaar ah oo adeeg, dheef, ama kullen³.

Qeexida Dadka naafada ah

Dadka naafada ah waa dadka qaba kala dhaltaalnaanta jidhka ama maskaxda oo si muuqata u xaddida hal ama in ka badan oo hawlaha nolosha ah. Hawsha nolosha ee muhiimka ah waxaa ku jiri kara, laakiin kuma xaddidna, araga, maqalka, cunida, seexashada, socodka,

¹ Tani waa ku celinta koowaad ee turjumaada ee magaca waaxda. Wawaan doonaynaa inaan si wada jir ah ula shaqayno bulshadda Boston si aanu si joogta ah u horumarno turjumaadan. Wawaan si naxariis leh u waydiisanaynaa oo u dhiirigelinaynaa faallo celinta turjumaadan. Fadlan farriin ugu soo dir xafiiskayaga lca@boston.gov

² Si joogta ah ayaanu u shaqaynaynaa si aanu u hubino dhammaan qaybaha waaxaha in la gaadhi karo oo si joogta ah waxaan uga shaqaynaynaa gaadhida dhammaan waaxaha. Haddii aad qabto su'aalo ama faallo celin ku saabsan aagaga qorshahan waaxeed, fadlan la xidhiidh: LCA@Boston.gov

³ **Luqadda Aan ahayn Weedh Ingiiisi ah:** Marka aanu fahmayno in eray bixinta Ku wanaagsnaanta Luqadda Ingiriisiga ah (LEP) ay isticmaasho HUD, xeerkan beddelkeeda waxa uu qaataa eray bixinta Luqad aan Ingiriisi ahayn (LOTE).



istaaga, qaadista, foorarsiga, hadalka, neefsashada, waxbarashadda, akhriska, diirad saarida, fekerka, wada xidhiidhka, iyo shaqada.

Qorshaha waxaa la cusboonaysiin doonaa 2 sannadood oo kasta waxaana ku jira qeybaha soo socda:

1. Heerarka Luuqada & Xogta tirada dadka loo aqoonsado inay yihii LOTE ama naafada qaba ee Magaalada Boston.
2. Barnaamijyada ay u badan tahay inay isticmaalaan shakhsiyadka ah LOTE iyo ama naafada ah
3. Helida banaamijyada iyo adeegyada muhiimka ah
4. Illaha loo heli karo dadka ah LOTE iyo dadka qaba naafooyinka
5. Dokumentiyada muhiimka ah
6. Soo xareynta Cabashada Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta

(1) Heerarka Luuqada & Xogta tirada dadka loo aqoonsado inay yihii LOTE ama naafada qaba ee Magaalada Boston.

Gudaha Magaalada Boston, 110,376 shakhsiyad ah, ama 16.9% dadka degan magaalada, uguma hadlaan Ingiriisiga sidii luuqadooda koowaad waxaanay baahi uun u qabaan helida luuqada ee hadalka, akhriska, qorida, ama fahanka Ingiriisiga. Guud ahaan, 15,886 qof, ama 2% ee dadweynaha Boston, ayaa loo aqoonsadaa inay qabaan naafanimada maqalka halka 15,861 qof, ama 2% ee dadweynaha Boston loo aqoonsado inay araga ka naafo yihii.

Macluumaadka dheeraadka ah ka eeg [Warbixinta Xogta Dadka ee Luuqadda ee Magaalada](#) iyo [Warbixinta Xogta Dadka ee Naafada](#) ee Magaalada. Si aad u aragto waxbixintan oo ku qoran luuqado badan fadlan booqo: boston.gov/lca

Magaalada Boston waxay raaci doontaa Heerarka Luuqada ee hoos ku qoran marka ay jiraan dhacdooyinka ay maalgaliso Magaalada Boston iyo Dokumentiyada iyo Macluumaadka Magaalada Boston.

Is dhiegalka Codeeyayaasha ee Magaalada Oo dhan

Magaaladu waxay ku bixin doontaa ogeysiis luuqado badan luuqadahan soo socda, iyadoo ku wargelinaysa codeeyayaasha in turjumaad la heli karo marka la cadsado. ASL ayaa looga baahan yahay dhacdooyinka magaalada oo dhan ee bixinaya macluumaad muhiim ah.

Waaxahu waxay kala tashan doonaan LCA iyo Komishanka Naafooyinka wixii hagitaan intaa dheer.

1. Isbaanish (Laatiin Ameerika)
2. Shiiniiska La Fududeeyay
3. Shiiniiska Caadiga ah
4. Kiriyoole Hayti



B

5. Fiidnaamiis
6. Kabo Ferdiin Kiriyool
7. Boortuqiis (Baraasiil)
8. Ruush
9. Carabi (caadi)
10. Faransiis (Yurubiyaaan)
11. Somali

Dokumentiyada/Macluumaadka Muhiimka ah:

Magaalada Boston waa inay bixisa Dokumentiyada/Macluumaadka Muhiimka ah luqaddaha soo socda:

- Isbaanish (Laatiin Ameerika)
- Shiiniiska La Fududeeyay
- Shiiniiska Caadiga
- Kiriyool Hayti
- Fiidnaamiis
- Kabo Ferdiin Kiriyool
- Shiiniiska kaantoonis
- Boortuqiiska (Baraasiil)
- Ruush
- Carabi (Caadi)
- Faransii (Yurubiyaaan)
- Somali

Munaasabadaha Xaafada:

Magaalada Boston waxay siin doontaa adeegyada turjumaada hadalka iyo qoraalka munaasabadaha Magaalada Boston ee lagu qabto xaafadaha qaarkood iyadoo ku saleysan luuqadaha hoose:

- **Allston** Shiiniis
- **Back Bay** waxba
- **Beacon Hill** waxba
- **Brighton** Shiiniis, Isbaanish, Ruush, & Bortuqis
- **Charlestown** Shiiniis
- **Chinatown** Shiiniis
- **Dorchester** Isbaanish, Fiidnaamiis, Hiyitaan Kiriyool, & Kabo Ferdiin Kiriyool
- **Downtown** Shiineys
- **East Boston** Isbaanish
- **Fenway** Shiineys
- **Hyde Park** Isbaanish & Hiyitaan Kiriyool
- **Jamaica Plain** Isbaanish
- **Longwood** Isbaanish



B

- **Mattapan** Hiyitaan Kiriyool & Isbaanish
- **Mission Hill** Isbaanish
- **North End** waxba
- **Roslindale** Isbaanish & Hiyitaan Kiriyool
- **Roxbury** Isbaanish, Kabo Ferdiin Kiriyool & Hiyitaan Kiriyool
- **South Boston** waxba
- **South Boston Waterfront** waxba
- **South End** Shiineys & Isbaanish
- **West End** waxba
- **West Roxbury** Hiyitaan Kiriyool

(2) Barnaamijyada ama adeegyada ay aad u badan tahay inuu isticmaalaan shakhsiyaadka ah LOTE iyo ama naafada ah

Jadwalka hoose waxa uu muujinayaa qeybaha waaxaha iyo barnaamijyadooda iyo adeegyadooda ay u badan tahay inay la macaamilaan dadka loo aqoonsado inay yihiin LOTE ama dadka naafada ah.

Qaybta	Barnaamijyada
Wacyi gelinta	<ul style="list-style-type: none">• Hoolka Magaalada Baabuurka Socda <u>foomka</u><ul style="list-style-type: none">○ Baabuurka Hoolka Magaalada waxa uu u adeegaa dadka degen Boston gudaha bulshooyinkooda. Hoolka Magaalada ee Baabuurka socda waxa uu booqan doonaa xaafadaha Boston sanadka oo dhan.○ Hoolka Magaalada ee Baabuurka Socda waxaa ku qalabaysan yahay ilaha helida luqadda sida VRI (Turjumaada Baahinta Onlaynka ah) iyo Laynka Luqadda oo waxay awoodaa inay bixiso habbaynta luqadda la dalbanayo sida loo baahdo.• Nadiifinta Xaafada<ul style="list-style-type: none">○ Nadiifinta Xaafada waxay ku midaysaa jaarka iyo bulshooyinka dhexda adeegyada jidheed, ka qayb qaadashada iyo horumarka dhulin yarada. Meelaha halka nadiifinta ay ka dhacdo waxaa ku jira beeraha bulshadda, goobaha dad waynaha, iyo dugsiyada.○ Qoraalada wacyi gelinta waxaa loo turjumay luqaddaha inta badan lagaga hadlo xaafada.○ Foomka Codsiga Mutadawaca waxaa lagu heli karaa dhammaan 11 luqaddood.



	<ul style="list-style-type: none"> ○ Wadaha Baabuurka CHOTG waxaa loo tababaray inuu fudeedeyo turjumaada la dalbanayo isagoo isticmaalaya ipad wixii ah turjumaada fiidiyaha fogaanta ah. ○ Ogaysiiska habbaynta waxaa lagu daraa dedaalada wacyi gelinta. ○ <u>Fiiro</u>: Hadda foomku waa xidhan yahay maadaama baabuurka CHOTG la dayactirayo. Marka baabuurka la sameeyo, foomka dib ayaa loo daari doonaa. <ul style="list-style-type: none"> ● Jeclow Dabaqaaga <ul style="list-style-type: none"> ○ Jeclow dabaqaaga waxay ku saabsan tahay dhammaan qurxinta xaafad kasta gudaha Boston iyaddoo la nadiifinayo jidatka, marinada dadka, baarkinada, iyo meelaha furan. ○ Qoraalada wacyi gelinta waxaa loo turjumay luqaddaha inta badan lagaga hadlo xaafada. ■ Foomka Codsiga waxaa lagu heli karaa dhammaan 11 luqaddood. ■ Ogaysiiska habbaynta waxaa lagu daraa dedaalada wacyi gelinta. ○ Kullanka Magaalada. <ul style="list-style-type: none"> ■ Kullanka Magaaladu waxa uu isku wada keenaa hogamiyayaasha magaalada, dadka degen, iyo daneeyayaasha bulshadda magaalada wayn oo dhan. Dhacdadu waxay u jeedadeedu tahay in sare loo qaado ka qayb qaadashada bulshadda oo la xoogeyyo dhaqanka magaalada ee goonida ah. Waxay bixin doontaa meesha wada shaqaynta iyo isku xidhka u dhexeeyaa qayb Boston ah badanka qareenada bulshadda saamaynta leh. ■ ASL & Turjumaada Luqadda waa la heli karaa. ■ Ogaysiiska habbaynta waxaa lagu daraa dedaalada wacyi gelinta.
--	---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

Barnaamijyadan, xeeladu waxay noqon doontaa in la xaqijiyo in mujtamacyada ay si macna buuxda leh u heli karaan dhammaan nidaamka iyagoo adeegsanaya Laynka Luqadda, Turjumaada Baahinta Onlaynka ah, iyo ogaysiyyada la turjumay, sida lagu muujiyay Luqadda iyo Qorshaha Helida Wada xidhiidhka.

(3) Helida banaamijyada iyo adeegyada muhiimka ah

Xafiiskayagu waxa uu si dhow ula shaqeyn doonaa xafiiska Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta si uu u helo hagitaan si aan u xaqijino helitaanka wax ku oolka ah ee hawlahaa, maclumaadka, adeegyada, iyo barnaamijyada muhiimka ah.

(4) Illaha loo heli karo dadka ah LOTE iyo dadka qaba naafooyinka

Magaaladu waxay heshaa kaalmada federaalka. Sidaas darteed, waxa waajib ka saaran yahay yareynta cabaqadaha luqada iyo isgaarsiinta ee dadka ka hor istaaga inay si buuxda u helaan adeegyada iyo barnaamijyada dowladda. Waax kasta waxa ay masuuliyaddi ka saaran tahay inay bixiso kharashka qaabiliaadaha, turjumaada qoraalka, turjumaada hadalka iyo teknoolajiyada caawinta ee soo socda ee adeegyada, maclumaadka, barnaamijyada ama dhacdooyinka ay Magaaladu bixiso. Tan waxaa kama mid ah:

- Turjumaada Luuqada Hadalka h: Fool ka fool, taleefanka iyo turjumaada muuqaalada foggaanta ah
- Turjumaada Luqadda Ishaarada/Gacmaha
- Turjumaada Dokumentiyada iyo Maclumaadka Muhiimka ah
- Turjumaada Waxyabaha Quran
- Qoraal u Beddelida Hadalka Isla-markaaba (CART)
- Teknoolajiyada Caawimada
- Qalabka Turjumaada Isku-marka ah

(5) Dokumentiga Muhiimka ah

Sanadka 2023-kii, Xafiiska Abaabulka Madaniga ah (OCO) waxay bilowday dib u eegida foomamka, waraaqaha iyo dokumentiyada loo isticmaalo maareynta barnaamijyadeeda, iyo aqoonsiga dokumentiyada loo tixgeliyo inay muhiim yihiin. Xafiiska Abaabulka Madaniga ah (OCO) waxay turjumi doontaa dokumentiyada muhiimka ah hadba intii macquul ah. Dokumentiyada muhiimka ah ee aan weli la turjumin waxaa ka mid ahaan kara Ogeysiiska luqaddaha badan. Ogeysiiskan waxa uu siiyaa codbixiyayaasha maclumaadka xiriirka si ay u codsadaan turjumaada bilaashka ah. Hoos ka eeg dokumentiyadayada muhiimka ah:

Liiska Dhokumentiga Muhiimka ah		
Cinwaanka Dokumentiga	Turjumaadaha	Qaababka la heli karo:
Hoolka Magaalada Baabuurka Socda	<ul style="list-style-type: none">▪ English▪ Español/Spanish	

B

Foomka Codsiga <i>Dhokumentigan waxaa buuxin kara cod bixiyayaasha si ay u cadsadaan Hoolka Magaalada Baabuurka Socda</i>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Kreyòl ayisyen / Haitian Creole ▪ 繁體中文 / Traditional Chinese ▪ Tiếng Việt / Vietnamese ▪ Kriolu / Cabo Verdean Creole ▪ Français / French ▪ Af Soomaali / Somali ▪ 简体中文 / Simplified Chinese ▪ Português / Brazilian Portuguese ▪ Русский / Russian ▪ العربية / Arabic 	
Warsidaha Xafiiska Abaabulka Madaniga ah <i>Dhokumentigan waxay ka kooban tahay machuumaadka ku saabsan adeegyada kala duwan iyo barnaamijka Xafiiska Abaabulka Madaniga sida Nadiifinta Xaafada, Jeclow Dabaqaaga, Ballanta Awooda Madaniga ah, iyo Hoolka Magaalada ee Baabuurka Socda.</i>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ English ▪ Español / Spanish ▪ Kreyòl ayisyen / Haitian Creole ▪ 繁體中文 / Traditional Chinese ▪ Tiếng Việt / Vietnamese ▪ Kriolu / Cabo Verdean Creole ▪ Français / French ▪ Af Soomaali / Somali ▪ 简体中文 / Simplified Chinese ▪ Português / Brazilian Portuguese ▪ Русский / Russian ▪ العربية / Arabic 	

(6) Soo xareynta Cabashada Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xareyso cabasho haddii aad dareento in lagu takooray. Magaaladu kama aargoosato sababtoo ah shakhigu waxa uu soo xareeyay cabasho ku andaconaysa takoor ku saleysan xaaladda LOTE ama naafanimo. Waaxdayadu waxay la shaqeyn doontaa Xafiiska Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta si wax looga qabto cabashooinka.

Sida loo soo xareeyo cabasho:

- **Fool ka fool: Na weydii [foomka cabashada](#) ee luqadaada**
 - [Large Print Version](#)
 - [Español / Spanish - Versión en Letra Grande](#)



- [Kreyòl ayisyen / Haitian Creole - Vèsyon an gwo lèt](#)
- [繁體中文 / Traditional Chinese - 大號字印刷版](#)
- [Tiếng Việt / Vietnamese - Chữ In Lớn](#)
- [Kriolu / Cabo Verdean Creole - Versón na Letra Grandi](#)
- [Français / French - Version en gros caractères](#)
- [Af Soomaali / Somali - Daabacaada farta weyn](#)
- [简体中文 / Simplified Chinese - 大字版](#)
- [Português / Brazilian Portuguese - Versão em Letra Grande](#)
- [Русский / Russian - Текст крупным шрифтом](#)
- [العربية / Arabic - نسخة بالخط الكبير](#)

- **Iimeylka: ku soo dir cabashadaada LCA@boston.gov**
- **Wac: 617-635-3414 si aad u soo xareyso cabasho**
- **Boostada: Soo dejiso [foomka cabashada](#) oo boosta ugu soo dir:**
 - 1 City Hall Sq. #500
 - Boston, MA 02201
 - Language and Communications Access
 - Room 817
 - [Large Print Version](#)
 - [Español / Spanish - Versión en Letra Grande](#)
 - [Kreyòl ayisyen / Haitian Creole - Vèsyon an gwo lèt](#)
 - [繁體中文 / Traditional Chinese - 大號字印刷版](#)
 - [Tiếng Việt / Vietnamese - Chữ In Lớn](#)
 - [Kriolu / Cabo Verdean Creole - Versón na Letra Grandi](#)
 - [Français / French - Version en gros caractères](#)
 - [Af Soomaali / Somali - Daabacaada farta weyn](#)
 - [简体中文 / Simplified Chinese - 大字版](#)
 - [Português / Brazilian Portuguese - Versão em Letra Grande](#)
 - [Русский / Russian - Текст крупным шрифтом](#)
 - [العربية / Arabic - نسخة بالخط الكبير](#)

- **Onlayn: Buuxi [foomkayaga onlaynka ah ee cabashada](#)**

- [Español / Spanish](#)
- [Kreyòl ayisyen / Haitian Creole](#)
- [繁體中文 / Traditional Chinese](#)
- [Tiếng Việt / Vietnamese](#)
- [Kriolu / Cabo Verdean Creole](#)
- [Français / French](#)
- [Af Soomaali / Somali](#)
- [简体中文 / Simplified Chinese](#)
- [Português / Brazilian Portuguese](#)
- [Русский / Russian](#)

○ [Arabic / العربية](#)



B

